


**Daahfurka dhismaha cusub ee hayu alqi uxyat**
**Qaababka Badan ee ka Qalinjabinta barnaamijyada waxbarashada kala duwan ee PPS**

Shaqaalaha PPS ee Qaaliga ahow

Waxaan ku faraxsannahay inaan kugu soo dhaweyno Dabaaldagga Daahfurka ***hayu alqi uxyat*** dhismihiisa **kaasoo loogu dabaaladagayo Qaababka Kala duwan ee Qalinjabinta ee barnaamijyada waxbarashada gaarka ah.** Dhacdadu waa **Sabtidaan, Sebtambar 21keeda, 2024, laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 1 duhurnimo** waxayna ka dhacaysaa 1530 NE Glisan St., Portland, OR 97232.

Goobtaan casriga ah waxay hadda xarun u noqonaysaa Alliance High School, DART/Kuumba School, Teen Parent Services and Childcare, iyo Reconnection Services and Center. Dhismaha oo ah dabaq 85,000 oo talaabo ooiskuwareeg ah wuxuu meel ka dhexaysa isugu keenayaa barnaamijyadaan bixinaya kaalmo dhammaystiran oo la siinayo ardayda kujirta shaqooyinkooda ka qalainjabinta. ***hayu alqi uxyat*** waa erey Chinook ah oo loola jeedo Waddooyin Badan oo Mustaqbalka ah.

**Xaflad gaar ah, bookhashooyin iyo waxyaabo kale**
Dhacdada waxaa kamid noqon doonta xaflad xarigjar ah oo khaas ah oo la keenayo sheekooyin dhiirigalin iyo isbadal ku saabsan kuwaas oo ka imaanaya shaqaalaha iyo ardayda MPG. Xafladda waxaa ka danbayn doona booqashooyin qofku ishagayo oo lagu tagayo dhismaha casriga ah, korontada ku shaqaynaya, bii’adana u wanaagsan. Waxyaabaha muhiimka ah waxaa kamid ah goobaha barnaamijka CTE ee baabuurta, farsamaynta, cunto karinta, khayradka dabiiciga ah iyo warbaahinta casriga ah, goob lagu barto cayaaraha jirka oo 500 oo kursi qaadda, goob lagu shaqeeyo, saqabka kore, iyo xarun loogu tala galay caruurta da’doodu kala duwan tahay oo leh garoon banaan oo lagu cayaaro.

**Baarkin bilaash ah ayaa laga helayaa Concorde Career College Portland, 1425 NE Irving Street.**

**Macluumaadka Mashruuca ee Dheeraadka ah**
Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo websaytka Barnaamijka Qalinjabinta Qaababka Kala duwan iyo Mashruuca deeqda qalinjabinta Qaababka Kala duwan websaytkiisa.

Wxaaan rajaynaynaa inaan halkaas kugu aragno!

Xaafiiska Casriyaynta Dugsiga.